

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-

Kormeerka horumarka sida lagu sharraxay ilahaani waxay waxtar weyn u leedahay dib-u-eegista dhismaha xirfadaha aasaasiga ah

, sida kuwa loo baray inay qayb ka yihiin himilooyinka sanadlaha ee la qiyaasi karo. Sidan oo kale, waxay si gaar ah waxtar u yeelan kartaa markii kooxaha Barnaamijka Waxbarshada Shakhsiyadeed (IEP) ay ka fiirsanayaan Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 ee la xiriira xirfad ama istaraatiijiyad gaar ah oo ardaygu ugu baahan yahay taageero dheeri ah cudurka aafada awgeed. Si kastaba ha noqotee, kooxaha IEP waxaa looga digayaa inay tixgeliyaan wadarta guud ee duruufaha deegaanka iyo bulshada ee cunugga si loo go'aamiyo baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19. Kormeerka horumarka ee xirfadaha aasaasiga ah ama xeeladaha kaligood kuma filnaan karaan in si buuxda loo go'aamiyo baahida Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19. Kooxuhu waxaa lagu dhiirigelinayaa inay tixgeliyaan [ilaha xogta dheeraadka ah](#) iyo [su'aalo ballaadhan](#), maadaama ay khuseeyaan, markay ka shaqeynayaan habka go'aannadaas loo gaarayo.

Falanqaynta xogta la socoshada horumarka waa mid ka mid ah waxyaabaha lagama maarmaanka u ah go'aaminta baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 iyo sida ugu wanaagsan ee loo bixin karo. Guud ahaan, la socoshada horumarka ayaa ah habraac lagu ururinaayo xogta si loo ogaado inta ay le'eg tahay sida ay ardayda ay muujinayaan horumarka laga leeyahay himilooyinka IEP. Fadlan eeg [Ilaha Xogta ee Kooxaha IEP Markaad Tixgelinayso Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qodobbada xogta ee suurtoogalka ah. Kormeerka horumarka sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa in lagu qiyaaso heerarka ardayda ee horumarka ee ujeedooyinka, si loo barbardhigo waxtarka noocyada kala duwan ee waxbarista ee la jaan qaadaya xirfadahan aasaasiga ah, iyo, muhiimad ahaan, in la go'aamiyo goorta loo baahan yahay isbeddel waxbarasho oo lagu taageerayo ardayda si ay u gaaraan himilooyinkooda. Kooxda IEP waa inay tixgeliyaan dib u dhaca ardayga ama la'aanta horumar wax ku ool ah marka la go'aaminayo baahida ardayga ee Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19.

Shaxaynta Xogta Hormarka Ardayga

Kormeerka wax ku oolka ah ee wax ku oolka ah wuxuu u baahan yahay kooxaha inay: (a) dejiyaan aasaaska ardayga ama heerka waxqabadka hadda ee xirfadaha aasaasiga ah ee ardaygu baran doono inta lagu jiro mudada IEP ee soo socota, (b) aqoonsiga himilada guusha ee ardaygu u baahan yahay inuu gaaro dhamaadka ee muddada loo qoondeeyay, iyo (c) go'aaminta inta horumarka ardaygu uu ku talaabsanaya waqtiga oo dhan si uu ula kulmo himilada (xariiqda goolka) Saldhigga, yoolka, iyo xariiqda yoolkaba waxaa lagu shaxdin (xardhi) karaa qaab elektaroonig ah ama gacan. Habraacan waxaa mara dhammaan himilooyinka IEP. Horumarka ardayga waxaa lagu cabiraa si joogto ah iyadoo la adeegsanayo baaritaano kooban ama si


fudud loo maamulo.

Xogta ayaa lagu shaxdinayaa oo la baarayaa si loo ogaado haddii ardaygu sameynayo horumar ku filan oo uu ku gaaro himilada, sida ku cad tusaalaha midig.

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-

Jaantus 1 Tusaalaha Sawirka Korjoogteynta Hormarka



Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-




Falanqaynta Xogta Kormeerka Horumarka

Ma jiro hab kali keli ugu wanaagsan ee lagu falanqeeyo xogta la socodka horumarka. Laba ka mid ah aaladaha sida badan loogu isticmaalo falanqaynta xogta waxaa ka mid ah xeerka *xeerka go'aanka afarta qodob* (*four-point decision rule*) iyo *falanqaynta jihada xariiqda* (*trend line analysis*). Mid kasta oo ka mid ah hoos ayaa lagu sharaxay:

Xeerka Go'aanka Afarta Qodob (Four-Point Decision Rule)

1. Waxaa lagu talinayaa in kooxaha IEP ay ururiyaan ugu yaraan lix illaa sagaal qodob oo xog ah ka hor inta aysan go'aan gaarin. Haddii macallinku ururinayo hal qodob oo xog ah usbuucii, tani waxay la macno tahay dib-u-eegista xogta qiyaastii lixdii toddobaadba mar.
2. Marka la soo ururiyo qodobada xogta, kooxuhu waxay isbarbar dhigi karaan xariiqda himilada iyo waxqabadka ardayda dhabta ah iyagoo adeegsanaya waxa loogu yeero Xeerka Go'aanka Afarta Qodob ah, ee hoos lagu muujiyey.

Shaxda 1 Xeerka Go'aanka Afarta Qodob (Four-Point Decision Rule)

Meeleynta Afarta Qodob ee Xogta ee Ugu Dambeysa	Talo Bixinta Tilmaamaha
<p>Afarta qodob ee xogta ee ugu dambeysa waxay ka hooseeyaan xariiqda yoolka.</p> 	<p>Beddel Tilmaamaha: Haddii afarta qodob ee xogta ugu dambeysa ay ka hooseeyaan xariiqda yoolka, tani waxay muujineysaa in ardaygu uusan sameynayn horumar ku filan oo ay u badan tahay inuusan la kulmi doonin yoolka sannadka dhammaadkiisa. Waxaa lagugula talinayaa in kooxdu ay isku daydo hagitaan tacliimeed oo kaladuwan ka dib markay sameyaan falanqeyn asal ah si ay uga caawiso go'aaminta sababta ardaygu uusan u sameynin horumar ku filan.</p>
<p>Afarta qodob ee xogta ee ugu dambeysa waxay ka koreeyaan xariiqda yoolka.</p> 	<p>Tixgeli Kordhinta Yoolka: Haddii afarta qodob ee xogta ee ugu dambeysa ay ka koreeyaan xariiqda yoolka, ardaygu wuxuu sameeyay horumar ka badan intii la filayay waxayna u badan tahay inuu la kulmi doono yoolka sannadka dhammaadkiisa sida ugu dhow. Kooxda IEP waa inay tixgeliyaan kordhinta yoolka.</p>
<p>Afarta qodob ee xogta ee ugu dambeysa waxay ka koreeyaan kana hooseeyaan xariiqda yoolka.</p> 	<p>Sii wad Tilmaamaha Hadda: Haddii afarta qodob ee xogta ee ugu dambeysa ay ka koreeyaan kana hooseeyaan xariiqda yoolka, ardaygu wuxuu sameynayaa horumar sida la filayo. Waxaa lagu taliyaa in kooxdu ay ku sii socoto waxbarista ardayga ayna sii wadaan la socodka horumarka.</p>

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-

Xogta la socodka horumarka ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa in lagu go'aamiyo heerka ardayga ee **horumarka (ROP)** muddo kadib, iyadoo loo tixraacayo cabir guud ama qaab tixraac ah. Macluumaadkani wuxuu faa'iido badan u yeelan karaa isbarbardhiga heerarka koritaanka ee xilliyada la beegsanayo iyo sidoo kale dejinta yoolalka mustaqbalka. Qaabka loo sameeyo waxaa ka mid ah in loo qaybiyo tirada toddobaadyada waxbarista inta ay le'eg tahay horumarka la gaadhay. Tusaale ahaan:

Kormeerka horumarka ayaa loo hayaa ardayga ka shaqeynaya xirfadaha aqrinta wanaasgan. Dhibcaha aasaasiga ah waxay muujiyeen in ardaygu uu aqrinayay ugu yaraan 40 erey daqiiqaddii oo leh yool loo dejiyay dhammaadka muddada waqtiga IEP. Kadib 9 usbuuc oo waxbarid ah kooxdu waxay rabtaa inay go'aamiso heerka horumarka ardayga. Dhibicdeeda ugu dambaysay waxay muujisay 48 erey oo sax ah daqiiqaddii. Si loo go'aamiyo heerka horumarka ardayga, kooxdu waxay isticmaashaa qaaciddada soo socota:

9 usbuuc oo waxbarid ah waxay dhalisay 8 erey oo daqiiqad ee la kasbatay (48 - 40 = 8) 9 asbuuc oo waxbarid ah oo loo qaybiyay 8da erey ee daqiiqad ee la kasbatay (8/9 = 1.12)

Falanqaynta Jihada Xariiqaa (Trend Line Analysis)

Qalabka labaad ee loo adeegsado falanqaynta xogta la socoshada horumarka waa falanqaynta jihada xariiqaa. In kasta oo cilmi baaristu muujineyso in falanqaynta jihada xariiqaa ay tahay **mid lagu kalsoonaan karo marka la qiimeynayo waxqabadka ardayga** marka la barbar dhigo 3 ama 4 xeerarka go'aanka 3-da ama 4-ta qodob (Ardoyn et al., 2013; Normal & Christ, 2016), waxay u baahan tahay waqti iyo khibrad dheeri ah illaa nidaamka horumarka elektarooniga ee ay kujirto falanqaynta jihada xariiqaa laga isticmaalo. Waxaa jira dhowr ilo oo intarneetka ah oo kaa caawin kara sharraxaadda habka loo abuurayo jihada xariiqaa ee xogta la ururiyey waqti ka dib. Guud ahaan, waa lagu talinayaa (fiiri, tusaale ahaan, Stecker & Lembke, 2011) in ugu yaraan 4 usbuuc oo waxbaris ah ay dhacdo ugu yaraan sideed qodob oo xog ahna la soo uruuriyay ka hor inta aan la go'aansan isbedelka waxqabadka hadda jira iyo in la barbardhigo xariiqaa yoolka. Marka kooxaha IEP ay isbarbar dhigi karaan jihada xariiqaa ardeyga iyo xariiqada himilada, waa inay tixgeliyaan talooyinka guud ee soo socda:

- Haddii xariiqaa horumarka ardayga uu yahay **mid ka taagan** xariiqaa yoolka, marka **kordhi** yoolka.
- Haddii isbedelka horumarka ardaygu **usan taagnayn** kana hooseeyo xariiqaa yoolka, marka **isbeddel barid samee**.

Marxaladaha Kormeerka Horumarka ee La Xiriira Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19

Xogta la socoshada horumarka waa in loo adeegsadaa hal qeyb oo macluumaad ah si looga caawiyo ka jawaabista su'aalaha iyo go'aan ka gaarista baahida loo qabo Adeegyada Soo-kabashada Shakhsiyeed ee COVID-19.

Iyagoo isticmaalaya xogtan kormeerka horumarka, kooxaha IEP waa inay weydiiyaan:


Marka la eego dhabaha kahor cudurka aafada iyo waxqabadka dhabta ah ee ardayga inta lagu gudajiray aafada, maxay tahay wadada soo kabashada ee macawilka ah hadana hanka leh ee ka caawin karta ku soo

Sida ku cad Jaantuska 2 (Tusaalaha Xogta Kormeerka Horumarka) ee hoose, kooxuhu waa inay tixgeliyaan xogta la socoshada horumarka muddada badan:

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-

- **Dhabaha Cudurka Aafada Ka Hor** : Halkee buu ardayga heerkiisa xirfadeed ee la rajeynayaa hadda ahaan lahaa haddii uusan COVID-19 dhici lahayn? **Dhabaha waxaa lagu muujiyey garaafka hoose sida sadarka buluuga ah ee ku calaamadaysan "Pre-COVID-19."**
- **Waxqabadka Ardayga ee Rasmiga ah Muddadii Aafada** : Sidee ayuu ardaygu wax u qabtay laga bilaabo Maarso 2020 illaa hadda? Sidee ayaa heerka kobaca ardayga kahor COVID-19 ugu barbardhigmaa xaddiga koriinkooda tan iyo Maarso 2020? Waa maxay arrimaha deegaanka iyo bulshada u baahan kara in laga wada hadlo si loo fahmo xogtan? **Waxqabadkaan waxaa lagu muujiyey garaafka hoose sida sadarka oranjiga ee lagu calaamadeeyey "Barashada Dhamaystiran ee Onlaynka ah" iyo sida xariiqa cawlan ee lagu calaamadeeyay "Isku-dhaf (Hybrid)"**
- **Dhabaha Kormeerka Horumarka** : Marka kooxaha IEP ay sameeyaan oo ay ogolaadaan Adeegyada Sookabashada Shakhsiyeed ee COVID-19 ee IEP, kormeerka horumarka socda wuxuu ka caawin karaa kooxda IEP (a) inay abuuraan yoolal cusub oo la odorosay, (b) bixiyaan qaab lagu cabiro heerka ardayga ee ku sii socota hadafyadan cusub iyadoo la adeegsanayo adeegyada soo kabashada, iyo (c) go'aaminta baahida loo qabo in dib la isugu soo noqdo oo dib looga fiirsado adeegyadan. **Djabadan waxaa lagu muujiyey garaafka hoose sida sadarka huruudda ah ee lagu calaamadeeyay "Adeegyada Soo-kabashada (Recovery Services)."**



Jaantus 1 Tusaalaha Xogta Kormeerka Horumarka

Ilaha Kormeerka Horumarka

Si aad wax badan uga ogaato qaababkan kormeerka horumarka, fadlan dib u eeg ilaha soo socda:

- Xarunta Qaranka ee Waxkaqabadka Xoogan (NCII) ee Machadka Cilmi-baarista Mareykanka:
 - [Adeegsiga Kormeerka Hormarinta Tacliinta ee Qorshaynta Waxbarida Shakhsiyeed \(DBI1\)](#)
 - [Adeegsiga Kormeerka Hormarinta Tacliinta ee Qorshaynta Waxbarida Shakhsiyeed \(DBI2\)](#)
 - [Dulmarka Xeeladaha Dejinta Yoolka Waxbarashada](#)
- Xarunta IRIS: [Mooduulka Kormeerka Horumarka](#)

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka



Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-

- [Shabakada Waxgabadka RTI \(RTI Action Network\)](#)
- [Xarunta horumarka: Kheyraadka loogu talagalay Barayaasha iyo Adeeg Bixiyaasha La Xiriira](#)

Ka faa'iideysiga Macluumaadka Korjoogteynta Horumarka

Si Go'aan looga gaaro Adeegyada Soo-



Tixraacyo

- Ardoin, S. P., Christ, T. J., Morena, L., Cormier, D. C., & Klingbeil, D. A. (2013). Dib u eegis nidaamsan iyo soo koobista talooyinka iyo cilmi baarista ku xeeran manhajka ku saleysan cabirka aqrin wanaagga hadalka *Xeerarka go'aanka CBM-R . *Journal of School Psychology*, 51, 1-18.
- Normal, E. R., & Christ, T. J. (2016). Cabbiraadda akhrinta ee ku saleysan manhajka: Sax ahaanshaha talooyinka xeerarka go'aannada saddexda qodob. *School Psychology Review*, 45(3), 296-309.
- Stecker, P. M., & Lembke, E. S., (2011). Adeegsiga Horumarsan ee CBM ee Aqriska (K-6); Buug-yaraha Xeeladaha Go'aan-gaarista Baridda. Xarunta Qaranka ee Kormeerka Horumarka Ardayda. Xafiiska Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ee Mareykanka. Laga keenay Juun 29, 2021 barta <https://files.eric.ed.gov/fulltext/ED519250.pdf>
- The Iris Center. (2005, Rev. 2019). *Kormeerka horumarka: Aqriska*. Laga keenay <https://iris.peabody.vanderbilt.edu/module/pmr/>